



Ilaahay wuxuu qoray maqaadiirta khalqiga inta aanu abuurin samooyinka iyo dhulka Kontan kun oo sano ka hor

Cabullaahi Binu Camar Binu caas Allaha ka raali noqdo isaga iyo Aabihiye wuxuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee isagoo leh: «Ilaahay wuxuu qoray maqaadiirta khalqiga inta aanu abuurin samooyinka iyo dhulka Kontan kun oo sano ka hor wuxuu yiri: carshigiisuna biyaha ayuu ka sareeyey».

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu sheegay in Ilaahay ku qoray looxul maxfuudka wixii dhici doona ee khalqiga qadarkooda ah iyadoo faah-faah taaso inta aanu abuurin samooyinka iyo dhulka konton kun oo sano ka hor, waxayna u dhicidoontaa sida uu Ilaahay casa wajala ugu talo galay. Wax kasta oo dhaca waxay ku dhacaan Ilaahay qadarkiisa iyo qadihiisa. Wixii adoonka ku dhaca ma ay gafeen, wixii aan ku dhicina kuma ay dheceen.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65038>

